



XAFIISKA QARAMADA MIDOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

WARSAXAAFADEED 42/2014

Ergeyga Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya oo Baydhabo ku tagey booqasho uu ku taageerayo hanaanka sameynta maamul-goboleedka

Baydhabo, 8 Sebtembar 2014 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Nicholas Kay, ayaa maanta booqday magaalada Baydhabo si uu u taageero dadaalka ay Dowladda Federaalka iyo dadka degaanka ugu jiraan inay dhisaan maamul cusub oo ku-meelgaar ah oo laga hirgeliyo gobollada koonfur galbeed Soomaaliya oo ka kooban Bay, Bakool iyo Shabeellaha Hoose.

Intuu joogay magaalada Baydhabo, Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay wuxuu la kulmay Guddoomiye Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamed Cusmaan Jawaari, iyo weliba saxiixayaasha heshiiska maamulka ku-meelgaarka ee koonfur galbeel Soomaaliya iyo xubno ka tirsan guddiga farsamo ee loo sameeyay meelmarinta heshiiska.

"Waxaan dhammaan dhinacyada ay arrintu khuseyso ku dhiirigelinayaa inay dedejiyaan hirgelinta heshiiskan. Xawaaraha geeddi-socodka dhisidda maamul-goboleedyada Soomaaliya waa inaan la carqaladeynin; waa qayb muhim ah oo ka mid ah geeddi-socodka dalku ugu jiro si uu u gaaro nabad iyo xasillooni. Waxaan soo dhoweynayaa sida ay dhammaan dhinacyadu uga go'antahay inay hirgeliyaan hanaan si buuxda loogu wada dhanyahay. "

"Waxaan ugu baaqayaa kuwa aan weli ku soo biirin geeddi-socodka inay taageeraan heshiiska kana qaybqaataan dhisidda Soomaaliya oo federaal ah." Ayuu raaciyay. "Dhammaan dhinacyadu waa inay sii wadaan inay hawlahooda u gutaan si waxtar leh oo nabad ah, waana inay ka fogaadaan falalka wax u dhimi kara nabadda iyo amniga."

DHAMAAD.